

# **Barnaamajka Suuqa Quudinta ee Beeraalayda Da'da wayn Xuquuqyada iyo Mas'uuliyadaha ka Qayb-galaha**

Suuqa Quudinta ee Beeralayda Da'da wayn (SFMNP) wuxuu dadka da'da wayn ee dakhligooda hooseeyo siyaa miro iyo khudaar oo looga dan lee-yahay in lagu sii hagaajiyo xaladdooda caafimaad iyo quudinta. Wuxuu xitaa kaalmeeyaa beeraha deegaanka iyada oo la kordhinaayo isticmaalidda suuqyada beeraalayda iyo dukaamada ku yaal dhinaca waddada. Waxaa kharashkooda qayb ahaan bixiyaa khasnadda Fedaraalka ee USDA.

## **Xuquuqdaada**

**Bacdamaa aad tahay codsadhaha/ka qayb-galaha Suuqa Quudinta ee Beeralayda Da'da wayn waxaad xaq u lee-dahay:**

- In lagula dhaqmo si qadarin leh, xushmad leh iyo takoorid la'aan;
- In si qoraal ah lagula socodsiiyo 15 maalin gudahood taariikhda codsigaga haddii lagu aqoonsado inaad xaq u leheen;
- Inaad ka qaadato racfaan go'aanka xaq-u- yeelashada haddii aad u aragtid in go'aankaas lagu sameeyay qalad;
- In macluumaadka aad soo bixisay loo xafido si qarsoodi ah ilaa aad adiga soo waydiisato in la qaybsado;
- Inaad ka soo cabatid haddii aad dareensan tahay in si fiican laguula dhaqmin;
- In lagu siiyo tusmooyin cad-cad sida iyo halka aad ku isticmaali kartid jeegagga lagu siiyo;
- Inaad wax ka baratid adeegyada kale ee lagu heli karo. Waxaad kala soo xiriiri kartaa Macluumaadka & Gacansiinta dadka Da'da Wayn haddii aad jeceshahay inaad ogaatid waxa ku saabsan adeegyada kale ee dadka da'da wayn ee aagga aad ku nooshahay.

## **Mas'uuliyadahaaga**

**Bacdamaa aad tahay codsadhaha/ka qayb-galaha Suuqa Quudinta ee Beeralayda Da'da wayn waxaa mas'uul ka tahay:**

- Inaad soo bixisid macluumaad sax ah sida ugu fiican oo aad garanayso si laguugu aqoonsado mudnaanta;
- Inaad fahamtid in soo bixinta warar been abuur ah iyo/ama in si ula kac ah u qarisid falal ay keeni karaan inaad dib u soo bixisid gargaarada ama tilaab sharciyeed lagaa qaado;
- Inaad fahamtid in haddii aad isku daydo in aad gargaarada ka aruursado in ka badan hal mar ama meelo badan xilligiiba inay keenayso in lagaa joojiyo barnaamajka;
- Inaad isticmaashid naf-ahaantaada badeecada cusub ee lagugu siiyay barnaamajka;
- Inaad ilaalsatid jeegagga lagu siiyo. Fadlan ku soo wargeli hay'adda soo bixisay jeegagga haddii ay kaa dhumaan ama lagaa xado.
- Inaad ku soo isticmaasho jeegga Beeralay Amarka u leh inta u dhexayso 1 Juunyo iyo 31 Oktoobar.
- Inaad fahamtid in kharashka lagu bixiyo barnaamajkaan uu xad lee-yahay waxuuna ku salaysan yahay in la siiyo qofka soo hormaro intii uu kharashka ka dhammaanaayo.

Sida uu qabo Sharciga Fedaraalka iyo siyaasadda Waaxda Beeraha ee U.S., waxaa hay'addaan ka mamnuucan inay samayso takoorid ku salaysan jinsiga, midabka, asalka jinsiyadda, lab iyo dheddig, da'da ama naafonimada ama aargoosasho kahor hawsha xuquuqaha rayidka ah ee kujira barnaamij kasta ama hawl kasta oo laqabto ama laga maalgeliyo dhinaca USDA. Si aad cabasho u samayso, u soo qor, USDA, Director, Office of Civil Rights, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410 ama soo wac (866) 632-9992 (cod) ama (800) 877-8339 (TTY). Foomamka cabashada waxaa sitoos ah looga heli karaa boggaan internetka ah: [http://www.ascr.usda.gov/complaint\\_filing\\_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html). USDA waa fursad lamid ah daryeel bixiyaha iyo loo shaqeeyaha.